DHAGEEYSO OO LA HADAL CANUGAAGA

NEWCOMER PARENT RESOURCE SERIES

Imaatanka wadanka cusub waxay saameyn ku yeelanaysaa qoyskaaga oo dhan. Waqtiga la qaado si aad isku xirantaan, dhageyso oo la hadla canugaaga waxay ka caawineysaa inay dareemaan ammaan badan, sidoo kale waa wax aad u farxad badan! Waxaad si wanaagsan u fahmi doontaa canugaada markii aad aduunka oo dhan ka aragtid indhihiisa. Waxaad sidoo kale awood u yeelan doontaa inaad iyaga ku caawiso waqtiyada adag uu soo maro oo ka wada qosla waxyaalaha layaabka leh. Marka aad wakhti la qaadatid oo aad ku dhageysato iyo aad kula hadasho ilmahaaga, waxay ka caawisaa inay dareemaan in si qaas ahaan loo jecel yahay.

Dhegeysashada Canugaaga

Dhageysashada waxaa ka mid ah wax ka badan isticmaalka dhegahaaga. Inta badan, waxaa loola jeedaa inaad si taxadar leh u fiirsato ilmahaaga si aad horay ugu aqoonsato haddii ay gaajeysan yihiin, daalan yihiin, cabsanayaan, walaacsan yihiin ama u baahan yihiin fiiro gaar ah. Marka aad si dhakhso ah waxa uga qabato baahida ilmahaaga, waxay dhiseysaa kalsooni. Carruurtu waxay si wanaagsan dareemaan marka dadka waaweyn ee muhiimka ku ah noloshooda uu dareemo iyo u daryeelo dareenkooda. Waxay sidoo kale noqon kartaa hab wanaagsan oo lagu caawiyo karo inay aqoonsadaan oo ay magacawaan dareenkooda. Tusaale ahaan, haddii ilmahaagu uu ooynaayo markaad kor usoo qaadato, waxaad ku oran kartaa: “Waxaad run ahaantii u hiistey hooyo. Anna sidoo kale aad ayaan kuugu xiisey.”

Carruurtu waxay sidoo kale doonayaan inay ku dhagaystaan marka aad adiga dhegeysaneyso. Ogoow waxa cunugaagu uu jecel yahay inuu ku ciyaaro oo uu ku biiro bashaalka si uu kugu caawiyo dhisidda xiriir adag.

Ka Caawinta Canugaaga inuu Hadlo

ILMAHA

Carruurtu waxay fiiriyaan wajigaaga oo waxayna dhegaystaan dhawaaqa codkaaga. Markaad fiirisid oo aad la hadashid ilmahaaga, ilmahaagu wuxuu dareemayaa inuu kuu dhow yahay. Marka ilmahaagu uu dholo-cadeeyo ama dhawaaqyo sameeyo, tani waxay bilow u tahay barashada hadalka. Carruurta waaweyn waxay badanaa sameeyaan codadka isku midka ah ee kaas adiga sameysay. Waxa kale oo aad dhaandhaanjin kartaa codadka ay sameeyaan si ay u dhiirigeliso inay hadlaan.

Marka hore, canugaada wuu oynayaa si uu kuu ogeysiiyo in uu wax u baahan yahay. Markii aad siiso waxa ay u baahan yihiin, waxay dareemayaan in la daryeelay. Mararka qaarkood way adagtahay in la ogaado waxa ay caruurtu u baahan yihiin, laakiin codkaaga degsiinmada leh iyo gacmahaaga raaxada leh ayaa dib ugu xaqiijin doona markaad isku dayayso inaad ogaato (tus., “Wax maa kugu dhacay?” Ama “Anigu waa kanaa”)

DHAGEEYSO OO LA HADAL CANUGAAGA

NEWCOMER PARENT RESOURCE SERIES

Inta u dhaxaysa da'da sagaal bilood iyo afar iyo toban bilood, guud ahaan ilmaha waxay bilaabaan inay isticmaalaan ereyo gaagaaban, laakiin macnaha ayaa ka weyn erayga. (Tusaale ahaan, “Mama” waxaa loola jeedi karaa “Hooyo aaway?” “I xambaar” ama “Taasi hooyo miyaa?”)

CARRUURTA

Ilmaha waaweyn iyo carruurta yaryarka (oo u dhexeysa da'da 18 bilood iyo 2 sano) ayaa si tartiib ah u fahmi karaan luqado badan oo badan. Waxay bilaabayaan inay isticmaalaan jimlada oo laba erey ku dhisan (tusaale ahaan, “Gaarigayga”. “Maxay kaas?”) Markaad ku hadashid afkaada hooyo, cunugaagu si fiican ayuu kuu fahmayaa.

Carruurta waxay wax ka bartaan ciyaaraha. Kula hadal afkaaga hooyo marka aad canugaaga wada ciyaaraysaan ayaa waxay ka caawin doontaa:

- Inay sii wadaan xiisaha dheer ee cayaarta;
- Inay fahmayaan oo ay baranayaan inay erayada ku dhawaaqaan;
- Inay noqdaan kuwo aad ugu hawlan cayaartooda; oo
- dareemaan Inay aad adiga kugu dhow yihiin.

CARRUURTA XANAANADA

Sida ay carruurtu hadalkooda u sii bato, ereyadoodu waxay noqdaan kuwo fasiix ah oo macne qoto dheer leh. Waxay bilaabaan inay isticmaalaan luqad si ay saaxiibo u sameeyaan Inta badan dadka kale carruurta la hadlaan, inta badan ee ay carruurta isku dayaan inay hadlaan. Haddii aad canugaada keliya aad la hadasho markii aad u sheegi rabtid waxa la sameeyo, ilmahaagu uma badnaanayo inuu yeelo.

Carruurta yaryar ayaa ah kuwo aad u xiiso badan waxaadna taasi u isticmaali kartaa in aad sheeko ugu bilawdo. Markii ay carruurta xanaanada bartaan in ay ku weydiiyaan “sabab?” waxaad ka hadli kartaa waxyaabo ay xiiseynayaan oo aad wax kawada barataan.

Talooyin ku Saabsan Horumarinta Luuqadda Canugaada

1. Dami TV-ga, raadiyaha iyo telefoonada gacanta. Yareynta buuqa ayaa carruurta ka caawin kartaa inay dhagaystaan. Ku xadid saacadaha daawashada TV-ga hal saac maalintii. Ka saar meesha waxyaalaha dareenka ilmaha duufsanayo marka aad doonayso in aad hadasho.
2. Sii wad kusii hadalka afkaaga hooyo kuna dhiiri geli ilmahaaga inuu kaaga jawaabo luuqadaada. (Fiiro Xaashida Tallooyinka Haysashada Afkaaga Hooyo wixii macluumaad dheeraad ah.)
3. Isla markiiba caawi ilmahaaga haddii ay kuugu baahan yihiin. Tani waxay u muujinaysaa inaad ogtahay markii ay kaalmadaada u baahan yihiin.
4. Hoos isku dhig oo waxaad siisaa dareenkaaga oo dhan marka ilmuhu doonayo inuu kula hadlo.
5. La hadal ilmahaaga ka bilaab marka ay daalan yihiin.
6. Isticmaal erayada fudud oo waydii su'aalo fudud.
7. Hagaaji ereyo iyo weedho gaaban ee cunugaagu wax ku barto (tusaale ahaan, “Badan.” “I caawiya.”).
8. Kala hadal waxa aad sameyneysid iyo waxa cunuggaagu uu sameeynaayo.
9. La wadaag xiisaha ilmahaaga markaad wada cayaaraysaan.
10. Fikrado cusub ku dar si aad ugu dhiirigeliso ilmahaaga inuu hadlo. (tusaale ahaan, Ciyaarta dukaanka adigoo iska dhigeysa inaad wax iibsanaysid iyo adoo wax gadeysid.)
11. Ku dar waxa ilmahaagu u dhahayo.
12. Ka yeel luqadda ciyaar badan adigoo isticmaalaya dhaqdhaqaayada jirka, wejiga, dhawaaqyo, codad, sheekooyin, cayaaro ama heeso.

Booqo **cmascanada.ca/cnc/parents** wixii macluumaad dheeraad ah oo waalidiinta laba luuqadlaha ah

CMAS
SUPPORTING CHILD CARE IN THE SETTLEMENT COMMUNITY / SOUTIEN DE LA GARDE DES ENFANTS DANS LA COMMUNAUTÉ DE RÈGLEMENT
Funded by: Immigration, Refugees and Citizenship Canada / Financé par : Immigration, Réfugiés et Citoyenneté Canada